



# Haween walba waa in ay ogaataa baaritaanka Pap tests.

Baaritaanka Pap tests wuxuu ka  
hortagaa kansarka ku dhaca  
makaanka afkiisa.

**Balan samayso maanta.**

BARNAAMIJKA  
BAARITAANKA  
KANSARKA KU DHACA  
MAKAANKA AFKIISA  
EE MANITOBA



  
CancerCare  
MANITOBA  
*ActionCancerManitoba*

*All translated materials completed in partnership with  
Sexuality Education Resource Centre*

### **Waa maxay baaritaanka loo yaqaan Pap test?**

Pap test waa baaritaan lagu heli karo isbedelada ku dhaca makaanka afkiisa. In la daaweeyo isbedelada xili hore ayaa looga hortegi karaa kansarka ku dhaca makaanka afkiisa.

### **Waa maxay makaanka afkiisa?**

Makaanka afkiisu waa daloolka xaga hoose ee ilma galeenka (Makaan). Ilmuhu marka ay dhalanayaan waxa ay soo maraan makaanka afkiisa.

### **Ma ubaahanahay baaritaanka Pap tests?**

Hadii aad galmo samaysay, waa ubaahan tahay baaritaanka Pap tests.

### **Mudo intee le'eg ayaan ubaahanahay baaritaanka Pap tests?**

Dumarka badankiisu sadexdii sanoba mar bay u ubaahan yihiin baaritaanka Pap test. Hadii natiijada baaritaanadaas ay wanaagsanaadaan kadib labadii sano hal mar ayaad ubaahantahay in aad aado baaritaanka Pap tests. Dhakhtarkaaga ama kaaliyaha caafimaadka kala hadal wixii adiga kuu wanaagsan.

### **Baaritaanka Pap test ma lagu ogaan karaa cudurada galmada la isugu gudbiyo (STI)?**

Maya. Hadii aad ka welwelsan tahay in aad jeermiska cuduradaas dhaliya qabto, kala hadal dhakhtarkaaga ama kaaliyaha caafimaadkaaga.

### **Hadii ilmo galeenka la iga saaray- weli miyaan ubaahnahay baaritaanka Pap test?**

Dabcan, weydii dhakhtarkaaga ama kaaliyahaaga.

### **Hadii aan dhalmo deys ahay-weli miyaan ubaahanahay baaritaanka Pap test?**

Haa

### **Goorma ayaan iska joojin karaa in aan isku sameeyo baaritaanka Pap test?**

Markii 70 sano aad gaarto waad iska joojin kartaa.

### **Goormuu ahaa baaritaankaygii Pap test ee iigu dambeeyey?**

Hadii aadan xasuusan baaritaankaagii kuugu danbeeyay ee Pap test, telefoon u dir 204-788-8626 ama telefoonka lacag la'aanta ah 1-866-616-8805 ama dhakhtarkaaga la xiriir.

### **Xagee ayaan ka ogaan karaa wax dheraad ah oo ku saabsan baaritaanka kansarka ku dhaca makaanka afkiisa?**

Ka la xiriir Barnaamijka Baaritaanka Kansarka ku dhaca Makaanka afkiisa ee Manitoba telefoonkooda (204) 616-8805 ama telefoonka lacag la'aanta ah 1(816) 616-8805 ama ama: